Oregon Department of Human Services

Ogeysiinta Soo sheegista Xadgudubka ee Waajibka ah: Dadka waaweyn ee qaba Naafanimada Korriinka

Si aad u soo sheegto xadgudub wac

1-855-503 SAFE (7233)

Qof adeegyo siinaya dad waaweyn oo qaba naafanimada korriinka ahaan, waxaad tahay **Soo sheegaha ay Ku waajibto** sida uu dhigayo sharciga Oregon (ORS 430.765). Sida uu dhigayo sharcigu, haddii aad hayso sabab macquul ah oo aad ku aaminto in qof weyn oo qaba naafanimada korriinka lagu xadgudbay, ama qof kasta oo xiriir idin dhexmaray lagu xadgudbay sida qof weyn, waa in aad si dhakhso ah xadgudubka ugu soo sheegtaa barnaamijka naafanimada korrinka ee bulshada, Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS), ama hay'ada dhaqangelinta sharciga ee degaanka. Ciidamada dhaqangelinta sharcigu waa in loo wacaa haddii ay jirto sabab lagu aamino in dembi la gelay. Marka ay khuseyso, waa in aad sidoo kale raacdaa siyaadaha iyo nidaamyada si talaabooyin degdeg ah loo qaado si loo ilaaliyo qofka dhibaatada xadgudub soo gaartay.

Ku xadgudubka qof weyn oo qaba naafanimo macnaheedu waa:

1. Cidleynta:

   Cidleynta, waxaa ka mid ah ka tegida ama si ula kac ah u cidleynta qof weyn ama wax kala noqoshada ama dayacaada mas'uuliyada iyo waajibaadyada uu kugu leeyahay qof qaba naafanimada korriinka oo uu sameeyo daryeel bixiye amd qof kale.

2. Xadgudubka jireed:

- Dhaawac jireed oo kasta oo soo gaara qof weyn oo ay sababto wax aan ahayn shilka, ama u muuqda in uu ku duwan yihiin sharaxaadda laga bixiyay dhaawaca.
- Xanuunka jireed ama dhaawac ee sida ula kaca ah loogu geyto qof weyn.

3. Xadgudubka galmo:

    - Xiriirka galmada ee la yeesho qof weyn oo aan oggolaansho laga haysan ama qof weyn oo aan awood u lahayn in uu oggolaado ficil galmo sida uu dhigayo ORS 163.315.
    - Dhibaatada galmada, ka faa'iidaysiga galmada ama in aan si ku habbooneyn loo soo bindhigo waxyaabo ama luqad si cad galmo u muujinaysa.
    - Xiriir galmo oo kasta oo dhexmara shaqaalaha xarunta ama daryeel bixiye lacag qaata iyo qof weyn oo ay u adeegto xarun ama daryeel bixiye.
    - Xiriir galmo oo kasta oo dhexmara qof ama iyo qaraabada qof weyn oo aan ka ahayn qofka la isqabo.
    - Xiriirka galmo oo kasta oo lagu gaaro xoog, khiyaano, hanjabaad ama qasab.
    - Xadgudubka galmo (Dembiile) oo ah ficil ka dhigan dembi sida uu dhigayo ORS 163.375, 163.405, 163.411, 163.415, 163.425, 163.427,163.465 ama 163.467.

Xadgudubka galmo "sexual abuse" kama dhigna xiriir galmo oo la isku raacsan/la oggol yahay oo dhexmara qof weyn iyo daryeel bixiye lacag qaata oo ah qof ay isqabaan qofka weyn.

Xiriirka galmo "sexual contact" wuxuu leeyahay macno la siiyay eraygaasi oo ku qoran ORS 163.305.

4. Dayacaada:

    - Ku guuldareysiga in la bixiyo daryeel, wax kor lagala socdo ama adeegyada lagama maarmaanka ah si loo ilaaliyo caafimaadka jireed iyo maskaxeed ee qof weyn taasi oo laga yaabo in uu waxyeello jireed ama waxyeello dhanka niyada ah soo gaarsiiyo qofka weyn.
    - Ku guuldareysiga in daryeel bixiyu uu sameeyo dadaal macquul ah si looga ilaaliyo in qofka weyn lagu xadgubto.
    - Diidmada adeegyada muhiimka ah si loo ilaaliyo caafimaadka iyo fayo-qabka qofka weyn oo horseeda waxyeello jireed oo soo gaarta qofka weyn.

5. Xadgudubka Dhanka Afka:

    Ku hanjabaada waxyeello jireed ama niyaddeed oo loo geysanayo qof weyn oo la adeegsanayo:
    Magacyo xaqiraad ah ama aan ku habooneyn, cayda, weerarada dhanka hadalka, aflagaado, ama jees jeeska. Dhibaateynta, qasbida, hanjabaada, cabsi gelinta, ceebeynta, naxariis darrada maskaxeed, ama hadalada dhanka galmada ee habbooneyn.

6. Ka faa’iidaysiga dhaqaale:

    - Si qalad ah u qaadashada hantiyeed, dhaqaale ama hanti uu leeyahay ama loogu talagalay in qofka weyni isticmaalo.
    - Walwal gelinta qof weyn iyada oo la gudbinayo/gaarsiinayo hanjabaad la xiriirta in si qalad ah loo qaato ama loo kharash gareeyo lacag ama hantida qofka weyn haddii uu qofka weyni si macquul ah u aaminsan yahay in hanjabaada la isku soo gudbiyay/gaarsiiyay la fulin doono.
    - Si qalad ah u kharash garaynta, u isticmaalida ama wareejinta iyada oo aan la haysan oggolaansho ah in wax lacag ah laga soo qaado koonto si wadajir ah loo leeyahay ama keli ahaan u leeyahay qof weyni.
    - Ku guuldareysiga in dakhliga ama hantida qofka weyn loo isticmaalo si wax ku ool ah taasi oo loogu talagalay taageerada iyo daryeelka qofka weyn.

7. Go’doominta aan lagu tala galin:

   Go’doominta aan lagu tala galin ee qofka weyn ee la xiriirta hawl fududaynta daryeel bixiyaha ama in lagu edbiyo qof weyn.

8. Xakamaynta Qaladka ah:

   Isticmaalka qaldan ee xakamaynta jireed ama kiimiko ee qof weyn, ka reebida ficilka xakamaynta ee uu qoray dhakhtar ruqsad haysta sida uu dhigayo ORS qodobka 677, kalkaaliyaha dhakhtarta oo ruqsad haysta sida uu dhigayo ORS 677.505 ilaa 677.525, dhakhtarka daawada dabiiciga oo ruqsad haysta sida uu dhigayo ORS qodobka 685 ama kalkaalida sare oo ruqsad haysata sida uu dhigayo ORS 678.375 ilaa 678.390 iyo hawlaha daaweyn kasta oo waafaqsan qorshe daaweyneed oo la oggolaaday ama la xiriir la leh amar maxkamadeed.

9. Dhimashada:

   Dhimasho kasta oo ku timaada qof weyn oo uu keeno wax aan ahayn shil ama hab aan dabiici ahayn.

10. Barnaamijyada Waxbarashada Dadweynaha ee ilaa fasalka 12aad:

    - Xakamaynta ama go’doominta qof weyn oo qaba naafanimada korrinka ee ku xadgudbaya ORS 339.288, 339.291 ama 339.308.
    - Ciqaabta jireed ee loo geysto qof weyn oo qaba naafanimada korrinka ee ku xadgudbaya ORS 339.250 (9).

Sharraxaadahan xadgudubka waxaa laga heli karaa ORS 430.735.

Sida sharciga waafaqsan, aqoonsigaaga qofka soo sheegista sameynaya ahaan waa mid qarsoodi ah.. Waxaa intaasi dheer, in sharcigu kaa ilaalinayo aargoosi ka yimaada bulshada xarunta, barnaamijka bulshada ama mid shakhsi marka aad soo sheegista u sameyso si daacad ah. Lagaama saari karo ama soo wareejin karo hal goob oo hay’adeed iyado oo lagu geynayo mid kale, lagaama joojin karo shaqadaada, darajadaada ama mushaharkaaga hoos looma dhigi

karo, ama laguuma diidi karo xiriir aad la yeelato xarunta ama dadka degan iyada oo sababtu tahay adiga oo si daacad ah u soo sheegay xadgudub la tuhunsan tahay. Haddii aad dareento in aargoosi lagugu sameeyay, waxaad xaq u leedahay in aad raadsato tallaabo sharciyeed oo gaar ah. Hay'ad kasta, barnaamij ama shakhsi oo aargoosi ku sameeya qof iyada oo sababtu tahay si daacad ah oo loo soo sheegay xadgudub la tuhunsan tahay waxaa laga yaabaa in uu masuul ka noqdo qofkaasi waxyeelada dhabta ah ee soo gaarta.

Saxiixida aad saxiixayso foomkan, waxaad qiraysaa in aad fahamsan tahay shuruudaha soo sheegista xadgudubka ee waajibka ah ee Oregon ee ku saabsan dadka waaweyn ee qaba naafanimada korriinka. Haddii aad fahamsanayn shuruudaha waajibka ah, ka codso iyaga in ay kuu sharraxaan ka hor inta aadan saxiixin foomkan.

Waan helay oo akhriyay ogeysiintani ku saabsan waajibaadyadayda la xiriira soo sheegista xadgudubka ee waajibka ah.

_____

Fadlan saxiix magacaaga Taariikhda Maanta

_____

Fadlan daabac magacaaga Taariikhda Maanta

FADLAN FOOMKAN U SOO CELI BARNAAMIJKAAGA

Ogeysiinta Soo sheegista Waajibka ah – Dadka waaweyn, IDD La cusbooneysiiyay Janaayo 2024

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso oo lacag la'aan ah. La Xiriir Xafiiska Tababarka, Baaritaannada iyo Ammaanka ODHS |OHA adiga oo email u diraya OTIS.Communications@odhsoha.oregon.gov, telefoon ahaan

(503) 945-9495 ama khadka bilaashka ah 1-866-406-4287 (codka). Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan.